# Cadeyn ku Saabsan Qarsoodinimada
## (Declaration Regarding Confidentiality)

**Cadeyn Hay'adeed:**

Cadeynta waxay tilmaamaysaa dhawr arrimood oo muhiim ah oo ku saabsan qarsoodinimada oo la rabo in tabaruceyaashu ka warqabaan. Haddii aad jeceshahay inaad akhridid cadeynta dhan ee hay'adda fadlan weydii qof ka tirsan shaqaalaha.

1. Waxa aanu ictiraafsan nahay in ilaalinta qarsoodinimada warka qaarkii ay lagama-maarmaan tahay waxana aanu u guntanay dhaqamada iyo hababka taa muujinaya.

2. Waxa aanu rumeysan nahay in warka isticmaaleyaasha adeeggayagu ay shaqaalahayaga u siiyaan si qarsoodi ah loo isticmaalo kaliya ulajeedada uu ugu talogalay isticmaalaha adeeggu. Sidaa daraadeed shaqaalahayagu iyo tabaruceyaashayadu ma bixin doonaan war waxyeeleyn kara amaanka qofka ama xuquuqda asturnaanta qofka.

3. Siyaasaddani waxay khuseysaa dhamaan warka helistiisa ay sabab u tahay xidhiidhka xirfadle ee aanu la leenahay isticmaalaha adeegga: waxa taa ku jira warka ah hadal ahaan, qoraal iyo diiwaano kombiyuutar.

4. Si loo sugo in tabaruceyaashayadu adeecan Xeerka Badbaadinta Xogta ee 1998 (Data Protection Act), waxa la rabaa inay ka warqabaan waxyaabahan soo socda:
   - **Warka shakhsi ama xasaasiga ahi waxa uu ku saabsan yahay arrimahan:**
     - asal sinji iyo qowmiyadeed
     - rumeynta diimeed ama dhaqameed ama siyaasadeed
     - Xubinnimada Urur Shaqaale
     - dookh galmo
     - diiwaan ama taariikh dambi
     - diiwaanada caafimaadka.
     - diiwaanada shaqaalaha iyo warka mushaharka
   - **Warka qarsoodiga ahi waxa uu ku saabsan yahay arrimahan:**
     - faahfaahinta guri kala-xidhiidhista (adreesyada iyo teleefonada)
     - taariikhda dhaqaale
     - diiwaanada xubinnimda
     - warka maalgalinta.

5. Shaqaalahayagu iyo tabaruceyaashayadu waxay u shaqeeyaan koox ahaan sidaa daraadeedna way wadi xidhiidhi doonaan oo wadaagi doonaan warka ku saabsan kooxaha iyo shakhsiyaadka marka taasi haboon tahay si loo sugo bixin adeeg oo fiican. Waxa kale oo ay kaydiyaan diiwaano, xog ah la-socod iyo liisas warqaado-diris oo la xidhiidha shaqada ay u qabtaan shakhsiyaadka iyo kooxaha.

**Cadeynta Tabarucaha:**

- Tabaruce ahaan waan akhriyay oo fahmay cadeynta kore ee ku saabsan qarsoodinimada waanan ogaalaaday inaan ku shaqo galo qodobadaa.
- Waan ilaalin doonaa qarsoodinimada macaamiisha Xarunta Tabarucidda (Volunteer Centre) iyo warka shakshiyeed, xasaasiga ama qarsoodiga ah ee isticmaaleyaasha adeegga.
- Waxa aan faahfaahintaa kala hadli doonaa kaliya tabaruceyaasha kale ama xubnaha shaqaale haddii ay haboon tahay ama lagama-maarmaan u tahay inaan guto doorkayga tabaruce ahaan.
- Dad ka baxsan hay'adda lama soo qaadi doono magacyada ama faahfaahin kale oo ku saabsan macaamiisha iyo isticmaaleyaasha adeegga.

Magaca oo ah Xuruuf Kala Go'an ________________________________ Taariikh: ____________

Saxeex ______________________________________